



Majiro qof muslim ah oo salaad faral ahi u soo gashay, oo wanaajiya waysadeeda, khushuuceeda, rukuuceeda, haduuse jiro waxaa loogu dhaafaa wixii dambi ahaa ee salaadaas ka horeeyey, hadaanu dambi wayn la imaan, arinkaasi waa sanadka oo dhan

Cusmaan Binu Cafaan -Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-isagoo dhahaya: "Majiro qof muslim ah oo salaad faral ahi u soo gashay, oo wanaajiya waysadeeda, khushuuceeda, rukuuceeda, haduuse jiro waxaa loogu dhaafaa wixii dambi ahaa ee salaadaas ka horeeyey, hadaanu dambi wayn la imaan, arinkaasi waa sanadka oo dhan."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkii ha ahaatee- wuxuu cadeeyey in qof walba oo Muslim ah oo uu u soo galo waqtiga salaada wajibka ah oo hagaajiya waysadeeda oo dhamaystira, ka dib ku khushuuca salaadiisa isagoo qalbigiisa iyo xubnihiisa hor gaynaya Ilaahay iyo waynankiisa, isagoo dhamaystiraya camalka salaada sida rukuuca, sujuuda iyo qayrki, salaadaasi waxay noqonaysaa mid loogu danbi dhaaf wixii danbi yar ar ahaa ee salaadaas ka horeeyey, haduusan la imaan danbi wayn oo ka mida danbiyada kabaa`irta, fadligaasi wuxuu jiraa waqti walba iyo salaad walba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6254>

